



## Maamule ka tirsan PPS oo ay waayo-aragnimo indhuhu ugu soo furmeen ka soo heshay Uganda

Jenny Withycombe waxay xasuuusataa dareenka ay iyada yeelatay markii ay dib soo duulaysay ee ay ku soo noqonaysay gurigeeda Portland ka dib laba toddobaad oo ay joogtay Kampala, Uganda, halkaasi oo iyada iyo nin ka qabaa ay ka soo qabteen shaqo mutadacnimo ah oo la xiriirta qoxootiga isku dayaaya in ay helaan nolol wanaagsan balse la tacaalaya xaalado ay dadka Maraykan ah oo tiro yari la kulmaan.

“Waxay ahayd waayo-aragnimo abaalmarin leh, laakiin sidoo kale waxay ahayd waayo-aragnimo aad u xun in aad aragto saboolnimo daran,” ayay sheegtay Withycombe, oo ah maamulaha barnaamijka loogu talagalay waxbarashada caafimaadka iyo jirka ee Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Withycombe waxay la shaqeysay ururka [Soccer Without Borders](#), oo ah urur caalami ah oo meel iskugu keena ciyaaraha iyo shaqada cadaaladda bulshada. SWB waxay xarun ku leedahay Kampala, oo ah caasimada iyo magaalada ugu weyn Uganda .

Withycombe waxay markii hore ogaatay SWB intii ay iyada wax ka dhigaysay Jaamacadda Colorado iyada oo ahayd in ay safar ku aado Uganda sanadkii 2016-kii, balse dib u dhigtay si ay shaqo uga bilowdo PPS. Janaayo, waxay heshay fursad ay ku aado, taasi oo iyada, ninka qaba iyo qiyaastii 10 ardayda jaamacadaha oo ka socday waddanka oo dhan ay ku biireen xarunta SWB si loo qabto bandhiga carruurta oo muhiimada la siinayo kubadda cagta, oo la qabtay intii lagu jiray fasaxii dugsiga ee jiilaalka ee labada toddobaad ahaa ee loogu talagalay ardayda ee Kampala.

Iyada oo sababtu tahay siyaasadaha socdaalka ee furan ee Uganda, waxay keentaa qoxooti ka kala socda dalal kala duwan, oo ay ku jiraan Sudan, Rwdna iyo Burundi. Qoxootigu waxay helaan gargaar marka ay ku nool yihiin xeryaha ka baxsan magaalada, laakiin dad badan ayaa doorta in ay ka dhaafaan gargaarka si ay u aadaan Kampala, iyaga oo rajeynaya in aad barwaqo ku gaaraan magaalada.

Luqadda rasmiga ah ee Uganda waa Ingiriisiga, iyada oo ay carruurtu si ay u dhigtaan dugsiga, ay tahay in ay muujiyaan heerka ugu hooseeya ee luqadda isla markaana ay bixiyaan lacag si aad u dhigtaan fasal (dugsigu ma aha mid lacag la'aan ah). SWB waxay carruurta ka caawisaa in ay bartaan Ingiriisiga iyo in qoysasku diyaariyaan kharashka waxbarista carruurtooda inta ay ku jiraan barnaamijyada sanadka oo dhan socda ee loogu talagalay in qaxootiga loogu diyaariyo dugsi muddo sanad gudihiis ah.

Intii uu socday bandhigu Withycombe iyo kooxdeedu waxay gacan ka geysteen ka qayb qaadashada maalin buuxda uu kubadda cagta la ciyaarayay iyo hawlo kale oo muhiimada la siinayay Ingiriisiga si looga caawiyo carruurtu in ay horumariyaan aqoontooda luqadda. Withycombe waxay ciyaartay kubadda cagta, laakiin waxay aad ugu wanaagsanayd tartanka ciyaarta doonyaha ee kulliyada.

“Heerka ciyarka kubadda cagta ee carruurta si weyn ayay u kala duwanaayeen, sidaa darteed waxaan u leexday in aan la joogo carruurta aan weli lahayn xirfad badan oo dhanka kubadda cagta ah,” ayay sheegtay.

Intii ay ku jirtay joogitaankeeda, Withycombe waxay muddo gaaban ku heshay koorsu ku saabsan nolosha ka jirta Kampala. Magaalada waxaa laga kor dhishay buuro/meelo taag ah, waxayna isla markiiba ogaatay qaab-dhismeedka bulshada ee tilmaamayay halka qofku ku nool yahay – dadka lacagta haystaa waxay ku noolaayeen meelaha sare.

“Marka aad jidka raacdoo ee aad hoos u socoto, dhammaan dooxooyinka u dhixeyya buuro/meelaha taaga ah waa halka isku-rarantu degan tahay,” ayay sheegtay. “Waxaad si toos ah u raaci kartaa dabaqada bulshada.”

Withycombe waxay ku soo wareegtay isku-raranta halkaasi oo ay qaxootigu ku nool yihiin. Qoysasku waxay lahaayeen meel kor ka daboolan oo ka dhisan meel u dhow meelaha la wadaago halkaasi oo dadku dhuxul wax ku karsanayeen. Biyaha socdaa waxay ahaayeen kuwa aan la cabi karin, sidaa darteed dadku waxay u lugaynayeen masaafad fog si ay caagado/weelal waaweyn biyo ugu soo buuxsadaan. Xayawaanka – aringga, idaha, lo’da, doofaarka, eyda, bisadaha – ayaa ahaa kuwo iska wareegayay, oo dhammaantood loo calaamadeeyay siyaabo gaar ah si loo aqoonsado cida iska leh.

Qoysasku waxay cunayeen waxa ay beerten, oo ay la socdaan bariis, digir iyo kaabaj oo si joogto ah loo cuno.

“Wuxuu runtii ahaa mid xoogan,” ayay Withycombe ka sheegtay safarka. “Wuxuu ahaa mid adag in la sameeyo iyada aanu jirin wax yar oo dareen ah. Waxaad qof u sheegi kartaa waxa ay u egtahay in lagu noolaado meelo isku-raran ah, laakiin haddii aan la aadin halkaasi si loo soo arko, loo soo uriyo, waxaa laga yaabaa in uusan jirin hab sax oo sharaxaad lagaga bixin karo.”

Qaxootiga intooda badani waxay sugayaan fursad ay ugu haajiraan waddan kale. Withycombe waxay xusuusataa la kulanka tababare ka tirsan SWB oo helay hadal ah in uu aadayo Maraykanka. Wuxuu Uganda joogay 10 sano, oo wax sugayay.

“Qaar badan oo ka mid ah waxay waqtii badan ku qaadan doonaan Uganda iyaga oo ah qoxooti,” ayay sheegtay Withycombe.

Iyada oo Withycombe ay ku soo laabatay Portland, hal shay oo aan maskaxdeeda ka bixin. Iyada oo xaaladuhu adkaayeen marka la joogo Kampala, hadana carruurtu ay la shaqeysay marnaba uma muuqan kuwo taasi ka turjumaya.

“Marnaba ma arkin ilmo aan faraxsaneyn,” ayay sheegtay. “Waxaan u maleynaya marka aan ka soo tegno dal horumaray isla markaana aan qaadano dabeecad sidan oo kale ah, ‘Masaakiintan fiiriya, waxay dareemaayaan murugo,’ laakiin marnaba ma arkin hal in ilmo oo yiraahda ‘waan caajisay,’ ma jirin hal ilmo aan faraxsanayn. Wuxaan isdhahay, waa la yaab, waxaan u baahanahay in aan awodno in dareenkani maskaxeed qaadano oo aynu bedelno fikirkeena oo aan dib u soo qaadano.”